



PROSPER PORTLAND

Building an Equitable Economy

 Somali 

Sanduuqa Maal gelinta Fursadaha Dhaqaalaha ee Dib u Habaynta Oregon (Reimagine Oregon):

TILMAAMAHA CODSIGA:

Sanadkaan, Barnaamijka Deeqda ee Sanduuqa Maal gelinta Fursadaha Dhaqaalaha ee Dib u Habaynta Oregon wuxuu yeelan doonaan hal wareeg, laga bilaabo Maarso 8. Dhammaan codsiyada waa in lasoo gudbiyaa ugu danbayn Isniinta Abriil 8-deeda saacadu marka ay tahay 5 galabnimo PST. Codsiyada aan dhamaytirnayn ayaan la tixgelin doonin. Dadka qaata deeqda ayaa lasoo wargelin doonaa bisha Maajo ama Juun 2024.

Waxaa la qaban doonaa kulannada xogta marka ay taariikhdu tahay:

Jimcada, Maarso 15, 2024 laga bilaabo 12-1 pm

Arbacada, Maarso 20, 2024 laga bilaabo 5-6 pm

Saacadaha Xafiiska Furan ee Oonlaynka ah ayaa la heli karaa Jimce kasta marka la gaaro 2 pm (ayna ku jirto Maarso 15) ilaa codsigu ka xirmaayo. Si aad uga qaybgasho kulannada xogta ama saacadaha xafiiska, fadlan booqo

<https://prosperportland.us/reimagine>. limeel u dir

ReimagineOregon@prosperportland.us haddii aad qabto su'aalo ku aadan codsiga.

Xasuusinnada codsiga xoogan:

- Sida ugu badan ee suuragalka ah, ku dar faahfaahin gaar ah iyo xog ku saabsan saamaynta ka dhallan karta iyo meelaha uu gaari karo qorshaha aad soo jeedinayso.
- Calaamadee qaybaha gaarka ah ee soo jeedintaada ee aad kaga duwan tahay dadka kale.
- Codsiyada waxaa lagu qiimeyn doonaa sida ay, u soo kala hormaraan – Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa inaad si miisaan leh diirada u saarto saamaynta lacagahaan ku yeelan karaan ganacsigaaga ama bulshada, aadna nala wadaagto hamigaas.

Xogta Ururka

Su'aalaha u Qalmida

Ururkaagu ma ka shaqeeyaa magaallada Portland? *

- Haa
- Maya

Ururkaagu inta badan ma u adeegaa bulshada Portland? *

- Haa
- Maya

Ururkaagu ma yahay ganacsi faa'iido doon ah, mid khayri ah, ama urur haysta taageerada 501(c)3? *

- Ganacsi Faa'iido Doon ah
- Khayri
- Urur haysta taageerada 501(c)3
- Midna kuwa kore

Soo jeedintaadu si toos ah ma u qusaysaa u doodis arrimo siyaasadeed? *

- Haa
- Maya

Xogta Dadka

Xogta dadka ayaan saamayn doonin u qalmida ama qiimeynta codsigaaga. "Adiga" waxaa laga wadaa Deeq Qaataha. Deeq qaatuhu waa qofka masuulka ka ah ururka, sida mulkiilaha ganacsiga ama Agaasimaha Guud.

Waa maxay magac u yaaladu? Doorro dhammaan meelaha ku khuseeya. *

- | | |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Ayada/naag | <input type="checkbox"/> Asaga/nin |
| <input type="checkbox"/> Ayaga/iyaga | <input type="checkbox"/> Magac u yaallo kale (halkaan ku qor) |
| <input type="checkbox"/> Ma doonaayo inaan sheego | |

Midkee kamid ah kuwa soo socda ayaa qeexaaya aqoonsigaaga isirka ama qoowmiyada? Doorro dhammaan meelaha ku khuseeya. *

- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska | <input type="checkbox"/> Asiyani ama Aasiyaan Ameerikaan |
| <input type="checkbox"/> Madow ama Afrikaan Ameerikaan | <input type="checkbox"/> Latine/a/o/x |
| <input type="checkbox"/> Kasoo jeeda Bariga Dhexe/Waqooyiga Afrika | <input type="checkbox"/> Dadka asalka ah ee Hawaii ama Dadka kale ee u dhashay Jasiirada Baasifiga |
| <input type="checkbox"/> Caddaan | <input type="checkbox"/> Magac u yaallo kale (halkaan ku qor) |
| <input type="checkbox"/> Waxaan doonayaa inaan anigu qeexo | |

Sidee ayaad ku aqoonsataa jinsigaaga? Doorro dhammaan meelaha ku khuseeya: *

Dhedig

Labeeb

Nimooow-naag

Wali aan go'aansan

Magac u yaallo kale (halkaan ku qor)

Aniga ayaa qeexaya jinsigayga:

Lab

Labo dareenle

Jinsi aan la xaqiijin, qaniis ama jinsi isku dhafan

Aan lahayn Jinsi ama Bilaa Jinsi

Meeqo sano ayaad jirtaa? *

5-17 sano

25-34 sano

45-64 sano

85+ sano

18-24 sano

35-44 sano

65-84 sano

Magac u yaallo kale (halkaan ku qor)

Macluumaadka Xiriirka

Magaca Qofka lagaala Xiriiraayo *

limeelka Qofka lagaala Xiriiraayo *

Example@example.com

Taleefanka Qofka lagaala Xiriiraayo

Qofka Lagaala Xiriiraayo sidoo kale ma yahay Deeq Qaataha? Deeq qaatuhu waa qofka masuulka ka ah ururka, sida mulkiilaha ganacsiga ama Agaasimaha Guud. *

Haa

Maya

Magaca Deeq qaataha *

limeelka Deeq Qaataha *

Example@example.com

Taleefanka Deeq qaataha

Xogta Ururka

Magaca Ururka *

(Qasab maaha) Magaca D.B.A. ga Ururka

"U Ganacsada Sida" - haddii ururkaaga lagu yaqaano magac aan ahayn kiisa sharciga ah

EIN ka ururka (Lambarka Aqoonsiga Loo shaqeeyaha) *

Haddii aadan haysan lambarka EIN wali, fadlan qor "NA"

Ciwaanka Ururka ee Layn 1 aad *

Ciwaanka Layn 2 aad

Magaalada *

Gobolka *

Koodhka boostada aaga *

(Qasab maaha) Webseedka Ururka

Qaybtee kamid ah Portland ayuu ururkaagu dagan yahay? *

Waqooyi

Waqooyi Bari

Waqooyi galbeed

Koonfurta

Koonfur Bari

Koonfur Galbeed

Meeqa shaqaale ah ayaa u shaqeeya ururkaaga? *

tusaale ahaan, 15

(Khayriyaadka ama ururada leh maal geliye dhaqaale) Waa maxay miisaaniyada sanadlaha ah ee shaqada ururkaaga? *

tusaale ahaan, \$5000

Fadlan halkaan ku qor magacyada xubnaha gudigaaga *

Kooxda Hogaanka Soo Jeedinta *

Waa kuwee dadka ugu muhiimsan ee doorka ku leh soo jeedintaan? Qor magacyada.

0/100

Waa maxay shaqada ganacsigaaga ama ururkaagu? *

0/100

Sidee ayuu ururkaagu u taageeraa isku dhafnaanta, sinaanta, iyo wadajirka? *

0/100

Yoolka Soo jeedinta

Soo jeedintaadu waa inay si guud u waafaqdaa midkood saddexdaan muhiimadood:

- Kor U qaadista Kobaca Ganacsiga iyo Hal Abuurka Ganacsiga.

Soo jeedinnada xoojinaaya siina kobcinaaya ganacsiyada horey u jiray korna u qaadaaya heerarka ganacsiyada cusub.

Deeqaha ayaa guud ahaan udhexeeya \$5,000 ilaa \$300,000.

Tusaaleyaasha mashruucyada waxaa ku jira laakiin kuma koobna: bixinta lacagta maal gelinta istaraatiijiga ah, taageerista kaabeyaasha ganacsiga iyo hormarinta nidaamyada, ku xirista ganacsiyada suuqyo cusub ayadoo la adeegsanaayo iskaashi iyo wada shaqeyn, taageerista ganacsiyada bulshadu leedahay (tusaale, shirkadaha iyo qaababka kale ee mulkiyada bulshada), barnaamijyada shaqo abuurka iyo tababarka, iwm.

- Dhisida Hantida Bulshada iyo Xoojinta Dhaqaalaha.

Soo jeedinnada kor u qaadaaya xirfadaha oo dhisaaya hantida xaqiijinaysa dhaqaalaha xoogan ee jilalka kaladuwan.

Deeqaha ayaa guud ahaan udhexeeya \$5,000 ilaa \$300,000; waxaana lagu bixin karaa deeqo sanado badan ah ururada khayriga ah, kuwaasoo soconaaya ilaa sadex sano).

Tusaaleyaasha mashruucyada waxaa ku jira laakiin kuma koobna: bwadajirka dhaqaalaha iyo barnaamijyada tacliinta, ganacsiyada bulshadu leedahay (tusaale ahaan, shirkadaha iyo qaababka kale ee mulkiyada bulshada), iwm.

- Abuurista Mashruucyo Isku xir ah oo Kor u Qaadaaya Wada Shaqeynta iyo

Wadajirka Bulshada

Soo jeedinnada abuuraaya goobo isku xiraaya xubnaha bulshada si kor loogu qaado kobaca dhaqaalaha iyo hormarinta bulshada guud.

Deeqaha ayaa guud ahaan u dhexeeya \$50,000 ilaa \$700,000.

Tusaaleyaasha mashruucyada waxaa ku jira laakiin kuma koobna: kordhinta fursadaha dhaqaalaha, mashruucyada hormarinta guryaha, iibinta guryaha, xarumaha ganacsiga, xarumaha bulshada, iwm.

Waa maxay ciwaanka soo jeedintaadu? *

Xog kooban oo ku saabsan Soojeedinta: *

Maxay soo jeedintaadu qabanaysaa? Sharax saamaynta deeqdu ku yeelan karto ganacsigaaga ama bulshadaada.

0/250

Tusaaleyaasha aad ku tixgelinayso khulaasada soo jeedintaada:

- Lacagtu ma kaa caawinaysaa inaad hesho qalab kordhinaaya fursadaha ganacsiga?
- Lacagtu ma kaa caawinaysaa inaad maal geliso ganacsigaaga si kor loogu qaado tayadiisa?
- Sidee ayaa lacagta loogu adeegsan karaa si loo dhiso hanti iyo hormarin dhaqaale?

Dooro muhiimada lacagta (ama muhiimadaha) soo jeedintaadu xalinayso: *

- Kor U qaadista Kobaca Ganacsiga iyo Hal Abuurka Ganacsiga
- Dhisida Hantida Bulshada iyo Xoojinta Dhaqaalaha
- Abuurista Mashruucyo Isku xir ah oo Kor u Qaadaaya Wada Shaqeynta iyo Wadajirka Bulshada

Sidee ayay soo jeedintaadu u waafaqsan tahay muhiimada maal gelinta ee la doortay? *

0/100

Cadadka Maal Gelinta la Codsadey *

tusaale ahaan, \$5000

Qaybaha A/B: \$5,000-\$300,000; Qaybta C: \$50,000-\$700,000

[Khayriyaadka] Maal gelinta soo jeedintaada ilaa muddo sadex sano ah. Fadlan sharax sida codsigaan sanadaha badan uu u balaarinaayo fursada dhaqaalaha ee bulshooyinka saamaynta xun kasoo gaartay Mamnuucida Xashiiska.

0/100

Horay maal gelin ma uga codsatay Prosper Portland? Haddii jawaabtu ay haa tahay, maal gelinno nooc ee ah ayaad ka codsatay Prosper Portland?

Haddii codsaduhu horay maal gelin uga helay Prosper Portland isla mashruuca, soo jeedinta uu u diray Barnaamijka Deeqda ee Sanduuqa Maal gelinta Fursadaha Dhaqaalaha ee Dib u Habaynta Oregon waa inuu muujiyaa sida lacagtu u kobcinayso, kor ugu qaadayso, ama u balaarinayso mashruuca in ka badan intii lagu qabtay maal gelintii horey loo helay.

0/100

Yay u adeegaysaa soo jeedintaadu? *

Sharax sida shaqada aad soo jeedinayso ugu adeegayso una taageerayso dadka saamaynta ugu badan kasoo gaartay Mamnuucida Xashiiska.

0/250

Saamaynada Mamnuucida Xashiiska ayaa saamaysay bulshooyinka wajahay si gaar ah heerarka sareeya ee danbi saarista ka dhalatay xashiiska, taasoo keentay saamayno jilaal badan soo socday oo la xiriira dhaqaalaha iyo nolosha bulshada. Xashiiska ayaa sharci laga dhigay gudaha Oregon bishii Luuliyo 1, 2015 ayadoo lagu ansixiyay Xeer 91.

Si aad u hesho xog ku saabsan sida lacagaha canshuuraha xashiiska loo adeegsan karo, fadlan akhri Xeerka Magaalada Portland 6.07.145:

<https://www.portland.gov/code/6/07/145>

Su'aalaha Haayada Khayriga ah/Urur Maal Gelin

Dhaqaale hela

Ururkaagu ma u adeegaa shaqsiyaad dhaqaale ahaan liita? *

- Haa
- Maya

Shaqsiyaadka Dhaqaale ahaan Liita waa dadka awoodooda ku tartamida suuqa ganacsiga xorta ah (tusaale, dhaqaalaha) uu dhaawac kasoo gaaray sabab la xiriirta dhaqaale yari iyo fursadaha daynta oo kooban.

Ururkaagu ma u adeegaa Shaqsiyaadka Bulsho Ahaan la Liiday? *

- Haa
- Maya

Dadka bulsho ahaan la liido waa dadk loo gaystay takoorka isir, qoowmiyadeed, ama dhaqan ama eexda uga imaanaysa bulshada Ameerikaanka ama nidaamyada sabab la xiriirta aqoonsiyadooda ayagoo ah xubnaha kooxaha iyo inaan la tixgelin tayooyinkooda qofeed.

Sidee ayay soo jeedintaadu u soo kabaysaa bulshada? Sidee ayay u caawinaysaa bulsho hormar iyo adkaysi leh? *

0/250

Sidee ayay soo jeedintaadu uga shaqeynaysaa taageerista ganacsiyada iyo xarumaha dhaqaalaha? Sidee ayay gacan uga gaysanaysaa xalinta caqabadaha bulshada si wadajir ah? *

0/250

Fadlan degso yoolalka si aad u doorato cabirada ku jira liiska hoose iyo/ama aad u furato cabirada guud ee sida ugu habboon u waafaqsan soo jeedintaada. Tusaalaha cabirka caadiga ah ayaa noqonaaya "Kordhinta Saamaynta Barnaamijka" higsii dhan "34%." Diirada saar inaad dejiso yoolal hiigsi fog laakiin la gaari karo. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad ku soo koobto yoolalkaaga su'aasha soo socota.

Fadlan degso yoolalka si aad u doorato cabirada ku jira liiska hoose iyo/ama aad u furato cabirada guud ee sida ugu habboon u waafaqsan soo jeedintaada.

- | | |
|--|---|
| <input type="checkbox"/> Tirada Dadka Saamayntu gaartay | <input type="checkbox"/> Tirada Shaqooyinka la Abuuray/La Ilaaliyay |
| <input type="checkbox"/> Tirada Ganacsiyada la Taageeraayo | <input type="checkbox"/> Tirada Dadka ka Qaybgalaaya Barnaamijka |
| <input type="checkbox"/> Tirada Iskaashiyada Cusub | <input type="checkbox"/> Qeex Cabirka Guud 1 |
| <input type="checkbox"/> Qeex Cabirka Guud 2 | <input type="checkbox"/> Yoolka Cabirka Guud 2 |

Soo Sheegista, Dukumiintiyada, iyo

Faallooyinka Dheeriga ah

Soo koob cabirada guusha soo jeedinta oo wadata yoolalka *

0/100

Sideeyay guushu kuuma muuqataa? *

Dhammaadka sanadkaan, maxaad dooneysaa inaad uga guul gaarto maal gelintaan? Sidee ayaad dooneysaa in arrintaani u saamayso ururkaaga ama bulshada? Xagee ayaad isleedahay ururkaagu waa gaari doonaa mustaqbalka?
0/250

Qaabab nooc ah ayaad filaysa inaad ula wadaagto saamaynta ama waxtarka soo jeedintaada? *

- Xog uruurinta Sanadlaha ah
- Jawaabta Muuqaalka ah
- Booqashada Goobta
- PowerPoint
- Su'aalaha limeelka lagu soo diro
- Warbixinta Saamaynta
- Kale

Jadwalka iyo Fududeynta Mashruuca: *

Si cad u sheeg jadwalka mashruucaaga iyo sida aad lacagta deeqda u maareynayso si aad u gaarto natiijooyinka aad dooneyso.

0/200

Misaaniyada: *

Waa maxay wadarta guud ee lacagta aad u heshay soo jeedinta? U qaybi qaybo oo si gaar ah u qeex inta suuragalka ah.

0/200

Si aad u hesho tusmo, waxaad tusaalaha ikhtiyaariga ah ee miisaaniyada ka helaysaa webseedka deeqda: <https://prosperportland.us/reimagine>

Waxaad sidoo kale soo gelin miisaaniyada soo gelin kartaa qaybta Dukumiintiyada Dheeriga ah qaybta danbe ee codsiga.

Baahida Dhaqaalaha *

Qeex baahida dhaqaale ee codsigaaga. Tixraac miisaaniyadaada sida ku haboon.
0/200

(Qasab maaha) Taageerada Bulshada:



Raadi Faylasha

Ku soo jiid oo ku rid faylasha halkaan

Kudar warqado kasta ama marqaati kacyo ka yimaada xubnaha bulshada oo taageeraaya mashruucaaga.

(Qasab maaha) Iskaashatada:

Fadlan liis garee iskaashato kasta oo dheeri ah oo aad ka codsatay wada shaqeyn, iyo haddii aad ka codsatay maal gelin.

Qasab maaha inaad keento dukumiintiyadaan wakhti xaadirkaan, laakiin waxaa lagaa dooni kartaa marka deeqda la aqbalaayo. Kuwaan waxaa ku jira:

- Caymiska Magdhawga Shaqaalaha oo waafaqsan ORS 656.017
- Caymiska Masuuliyada Guud ee Ganacsiga ama mid u dhigma oo leh xadiga keliga ah oo aan ka yareyn \$1,000,000 marka ay dhacdo, dhaawaca jirka iyo waxyeelada hantida, oo leh xadiga guud oo dhan \$2,000,000?

- Dukumiintiyada dheeriga ah ee loo baahan yahay marka loo baahdo (kuwaasoo uu ku jiri karo foomka W-9, ACH, Diiwaan gelinta Gobolka Oregon iyo Magaalada Portland, iyo foomamka kale ee ay kaa dooneyso Prosper Portland).

Ururkaagu ma bixiyaa Caymiska Magdhawga Shaqaalaha sida ku cad ORS 656.017? *

- Haa
- Maya

Deeq qateyaashu waa inay lahaadaan Caymiska Magdhawga Shaqaalaha. Cadeynta Caymiska Magdhawga Shaqaalaha ayaan qasab ahayn si aad u codsato deeqda, laakiin marka aad doorato "maya," waxaad qiraysaa in kani shardi u yahay si aad u aqbasho heshiiska deeqda. ORS 656.017 ayaa ka doonaaya in loo shaqeeyaashu ay caymiska magdhawga shaqaalaha siiyaan shaqaalahooda. Caymiskaan ayaa qasab ku ah deeq qateyaasha leh shaqaale dhan hal ama ka badan, ilaa in looga dhaafo maahee qodobka ORS 656.027.

Ururkaagu ma leeyahay Caymiska Guud ee Masuuliyada Guud ee Ganacsiga ama mid u dhigma oo leh isku dhafka halka xadi ee dhaawaca jirka iyo waxyeellada hantida oo aan ka yareyn \$1,000,000 ayadoo ku xiran marka uu dhacaba, iyo xadiga guud oo aan ka yareyn \$2,000,000? *

- Haa
- Maya

Deeq qaatuhu wa inuu haystaa Caymiska Masuuliyada Guud ee Ganacsiga ama mid u dhigma. Cadeynta Caymiska Masuuliyada Guud ee Ganacsiga ayaan qasab ahayn si aad u codsato deeqda, laakiin marka aad doorato "maya," waxaad qiraysaa in kani shardi u yahay si aad u aqbasho heshiiska deeqda. Caymiska noocan ah ayaa ku siinaaya caymiska masuuliyada qandaraaska ee magdhawga lagaaga doonaayo heshiiskan. Waxaa intaas dheer, "Prosper Portland, Magaalada Portland iyo mid kasta oo kamid ah saraakiisha matalaysa, wakiillada iyo shaqaalaha" waa in lagu daraa Caymiska Dheeriga ah marka laga hadlaayo shaqooyinka deeq qaataha ee heshiiskan.

Dukumiintiyada lagaa Rabo - Qasab maaha wakhti xaadirkaan inaad raaciso codsiga, laakiin waxaa lagaa dooni karaa inaad keento foomka W-9, foomka ACH, diiwaan gelinta Gobolka Oregon iyo Magaalada Portland oo aad buuxisay, cadeynta dukumiintiga caymiska, ama foomamka kale ee ay kaa dooneyso Prosper Portland oo qayb ka ah aqbalaada deeqda lacageed. Marka aad gujiso qaybta "Haa" ee hoose, waxaad aqbalaysaa in kuwaani yihiin shuruudaha. *

- Haa
- Maya

Haddii aad qabto wax su'aalo dheeraad ah oo quseeya codsigaaga, halkaan ayaad ku soo lifaaqi kartaa.



Raadi Faylasha

Ku soo jiid oo ku rid faylasha halkaan

Dukumiintiyadaan ayaa noqon kara miisaaniyadaha, warbixinnada sanadlaha ah, ama wax kasta oo kale oo taageeraaya codsigaaga.

Haddii aad hayso wax tilmaamo ama faallooyin kale ah, halkaan ku qor.

Marka aad gujiso batoonka hoose ee dirista, waxaad qiraysaa in xogta ku qoran codsigaan ay run tahay ayna dhamaystiran tahay inta aad ogtahay, iyo in ay kula soo xiriiri karaan shaqaalaha Prosper Portland si aad u siiso xog dheeri ah ama dukumiintiyada si loo dhameystiro codsigaaga iyo/ama loo xaqiijiyo u qalmida.

Kaydi

Gudbi